Casharka 52

1. Sidee baa Nikodemos ku gartay in Ilaah soo diray Ciise?
-Waayo Ciise wuxuu sameeyey mucjisooyin badan oo Ilaah keliya uu samayn karay.

2. Miyaa dhalashada biyaha ay ka macne tahay makhuuriska?
-Maya.

3. Miyaa makhuurisku ina badbaadinayaa?
-Maya.

4. Maxaa Ciise uga gol lahaa mrkii uu lahaa: Qof haddaanu ka dhalan biyo?
-In biyo laga dhasho waxay ka macne tahay inaan dembiyadeenna ka toobad keenno si Ilaah inooga nadiifiyo dembiyadeenna.

5. Muxuu Ciise uga gol lahaa markii uu lahaa: Haddaanu qofku ka dhalan Ruuxa?
-Haddaba in Ruuxa laga dhasho waxay ka macne tahay in Ilaaha Ruuxa Qodduuska ah uu ruuxeenna siiyo nolol cusub.

6. Muxuu haddaba Masiixa ka hadlayey markii uu lahaa, Waxa jidhka ka dhashaa waa jidh, waxa Ruuxa ka dhashaana waa Ruux?
-Wuxuu Ciise uga gol lahaa taas in jidhku jidh yahay, oo aanu is-beddelaynin, laakiin Ilaaha Ruuxa Qodduuska ah ayaaah kan keliya ee ruuxeenna siin kara nolo cusub ama dhalasha labaad.

7. Marka la eego dhanka Ilaah, waa kuwee labada kooxood ee dunidan ku nool?
-Labada kooxood waxay kala yihiin kuwa dhasha halka mar, iyo kuwa labada goor dhasha. Marka hore waxaad u dhalanaysaa jidh ahaan dabadeetana ruux ahaan.

8. Qoyskee bay ka tirsan yihiin kuwa dhasha mar qura?
-Waa qoyska Shayddaanka.

9. Waa qoyskee kuwa mar kale dhasha?
-Waa qoyska Ilaah.

10. Maxay isaga ekaayeen Ciise iyo abeesadii naxaasta ahayd ee Muuse lagu amray inuu ka soo laadlaadiyo geed ku yaalla lama degaanka?
-Isla sida abeesada naxaasta ahayd oo kale ee ka soo laadlaadday geedka, ayaa Ciisena laga soo laadlaadiyey iskutallaabta oo la sudhay duleedka Yeruusaalem.
-Isla sidii reer binu Israa'iil looga babaadiyey qaniinyada abeesada oo ayan u dhiman markii ay abeesada naxaasta ah oo geedka laga soo laadlaadiyey, ayaa Ciise badbaadinayaan kuwa isaga rumaysta.

11. Maxaa Ilaah Ciise ugu soo diray dunidan?
-Si uu dadka uga badbaadiyo awoodda dembiga, dhimashada iyo Shayddaanka.

12. Miyaa kuwa rumaysan Masiixa uu Ilaah xukumayaa?
-Maya.

13. Waa maxay sababta kuwa aan Masiixa rumaysnayn horey Ilaah ugu eedeeyey?
-Waayo ma ayan rumaysan in Masiixu yahay Sayidka Badbaadiyaheenna ah.

14. Waa maxay sababta dadku ayan u doonayn inay maqlaan Hadallada Ilaah?

-Waayo waxay jecel yihiin dembi.

-Maalin maalmaha ka mid ah, ayaa Ciise wuxuu ku soo noqday deegaanka Kafarna'uum.

Bal aynu akhrinno Markos 2:1-2

1-Dhawr maalmood dabadeed goortuu haddana Kafarna'um galay, waxaa la maqlay inuu guriga joogo.
2-Markaasaa waaa is-urursaday dad badan, sidaas daraaddeed meel ay joogsadaan ayay ka waayeen xataa albaabka hortiisii, oo iyaga ayuu hadalkii kula hadlay.

-Dad badan ayaa waxay u yimaadeen inay maqlaan waxbaridda Ciise.

-Ciise wuxuu iyaga baray Hadallada Ilaah.

-Hadallada Ilaah eeMasiixu dadka baray waa isla Hadallada Ilaah ee aynu haatan idin barayno.

-Hadallada Ilaah isma beddelaan.
-Hadallada Ilaah weli waa u siman yihiin dadka oo dhan.

-Isla sida dadku ay u maqalayeen Ciise oo Hadallada Ilaah dadka baraya, ayaa Ilaah haatan doonayaa in adigu aad maqasho Hadallada Ilaah marka aynu ku barayno ama kuu soo qorayno.

-Maadaama Ciise dadka uu ku barayey guri dhexdiis, oo sababtaas aawadeed waxaa gurigii yimid ama soo galay dad aad u fara badan inay Ciise Masiix maqlaan, oo meel la fariistona ma lahayn guriga dhexdiisa.



-Waxaa weliba dadku ay taagnaayeen iridda bannaankeeda, oo meel bannaanna ma jriin.

-Marka Masiixu uu dadka barayey, waxaa la keenay nin cuuryaan ah.

Bal aynu akhrinno Markos 2:3

3-Kolkaasay yimaadeen oo nin curyaan ah u keeneen, waxaana siday afar qof.

-Miyaa ninka curyaanka ah awooday inuu is-bogsiiyo?
-Maya.
-Miyaa saaxiibbada ninkii curyaanka ahaa ay awoodeen inay isaga daweeyaan?
-Maya.

-Miyaa dhakhtr ka mid ah dhakhtarradii waagaas uu bogsiin karay ninkan curyaanka ah?
-Maya.

-Isla sida ninkan curyaanka ah aanu u awoodaynin inuu is-bogsiiyo, ayaa cidina ayan u awoodaynin inay iska badbaa-diso awoodda dembiga, dhimashada, iyo Shayddaanka.

-Maxay haddaba raggii ninka curyaanka ahaa waday sameeyeen?

Bal aynu akhrinno Markos 2:4

4-Goortay u soo dhowaan kari waayeen dadkii badnaa daraaddiis ayay saqafka dusha ka fureen meeshuu joogay. Goortii ay jabsheen waxay ka soo dejiyeen sariirtii ninkii curyaanka ahaa

ku jiifay.

-Waayo, waxaa jira dad aad u badan oo guriga ku dhex jiray oo dhegaysanayey Ciise, oo meel ka bannaan qolka ma lahayn, raggii waday ninka curyaanka ah waxay sariirtii ama bareelihii uu ku jiifay ay ka soo geliyeen saqafka dushiisa.

-Waxay soo jebiyeen qayb ka mid ah saqafka guriga, waxaanay hoos u soo dejiyeen ninkii oo isagu ku jifa bareelle, oo waxay hor keeneen Ciise.

-Maaddaama guryaha dadka Yuhuudda ah ay dhistaan ayaa wuxuu leeyahay saqaf siman oo laga sameeyey dhoobo iyo qoryo, dadkuna si fudud ayey u soo jebin karaan, isla sida hormadan afarta ah ee ninka curyaanka ah wadaaba ay yeeleen, waxaanay ninkii hoos uga soo dejiyeen guriga, oo waxay hor keeneen Masiia.

-Nimankanu yey hor keeneen ninkii curyaanka ahaa?
-Ciise.
-Muxuu Ciise sameeyey?

Bal aynu akhrinno Markos 2:5

5-Ciise kolkuu rumaysadkoodii arkay, ayuu ninkii curyaanka ahaa ku yidhi, Wiilkow, dembiyadaadu waa cafiyan yihiin.

-Ciise wuxuu arkay in raggii ninka curyaanka ah waday ay dhab ahaan isaga ku kalsoonaayeen, wuxuuna cafiyey ninkii curyaanka ahaa dembiyadiisii.



-Waxaa haddaba jiray qaar ka mid ah macallimada sharciga oo ahlkaas fadhiyey.

-Markii Ciise uu cafiyey ninkii curyaanka ahaa dembiyadiisa, maxay macallimada sharcigu qalbiga iska lahaayeen?

Bal aynu akhrinno Markos 2:6-7

6-Laakiin halkaa waxaa joogay qaar culimada ah oo iska fadhiyey oo qalbiyadooda ka fikirayey, oo waxay isku yidhaahdeen,
7-Ninkanu muxuu sidan ugu hadlayaa? Wuu caytamayaa. Ayaa dembiyo cafiyi kara Ilaah keliya maahee?

-Macallimada sharciga waxay la ahayd in Ilaah oo keliya cifiyo dembiga.

-Haddaba miyaa macallimada sharcigu si wanaagsan u fakarayeen?
-Haa.

-Ma run baa in Ilaah oo keliya uu cafiyi karo dembiga?
-Haa.
-Miyaa cidina ay dembiga dadka cafiyi kartaa?
-Maya.

-Miyaa wadaad cafin karaa dembiga?
-Maya.

-Maxa Ciise u awooday inuu dadka dembiyadooda cafiyo?

-Waayo Ciise waa Sayid iyo Rabbi ama Wiilka Ilaaha Nool iyo

Masiixii Ilaah.

-Macallimada sharciga waxay la ahayd in Ciise Ilaah jaa'ifaynayo.

-Miyaa macallimada sharciga si hagaagsan u fikirayeen?
-Maya.

-Miyey xaqiiqo tahay in Ciise jaa'ifeeyey Ilaah?
-Maya.

-Ciise ma uusan jaa'ifaynin Ilaah.

-Miyaa Ciise garanayaa waxa macallimada sharciga ay ku fikirayeen?

Bal aynu akhrinno Markos 2:8

8-Kolkiiba Ciise ruuxiisuu ku ogaaday inay sidaas qalbiyadooda ka fikirayaan, oo wuxuu ku yidhi, Maxaad waxan qalbiyadiinna ugaga fikiraysaan?

-Weliba macallimada sharciga waxba afka kama ayan oran ama dhihin, balse Ciise wuxuu garanayey wixii ay ku fikira-yeen.

-Waayo Ciise waa Masiixii Ilaah iyo Rabbi, oo wuxuu garanayey waxa ku jira fikirka dadka.

-Dabeetana, muxuu Ciise yiri?

Bal aynu akhrinno Markos 2:9-12

9-Iyamaa hawl yar, in curyaanka lagu yidhaahdo,



Dembiyadaadu waa cafiyan yihiin, ama in lagu yidhaahdo, Kac oo sariirtaada qaado oo soco?

10-Laakiin si aad ku garataan in Wiilka Aadanahu dhulka ku leeyahay amar uu dembiyada ku cafiyo (ayuu ninkii curyaanka ahaa ku yidhi),

11-Waxaan ku leeyahay, Kac oo sariirtaada qaado oo gurigaaga tag.

12-Kolkiiba wuu kacay oo sriirtiisii qaatay; wuuna baxay dadkii oo dhan hortooda, sidaa darteed ayay la wada yaabeen, wayna ammaaneen Ilaah, oo waxay yidhaahdeen, Weligayo sidan oo kale ma aannu arag.

-Ciise wuxuu dadka ku yiri waxaan leeyahay awoodda lagu cafiyo dembiyada.

-Waa maxay sababta Ciise ku yeeshay awoodda uu dembiyada ku cafiyo?

-Waayo Ciise waa Rabbi.

-Ciise wuxuu tusay dadka rabbaaninimadiisa markii ninkii curyaanka ahaa uu bogsiiyey gebi ahaanba.

-Maxaa Ciise awoodsiiyey inuu bogsiiyo ninkan jirran?
-Waayo Ciise waa Rabbi.

-Ilaah oo keliya ayaa awooda inuu bogsiiyo inka curyaanka ah.

-Wixii intaas ka dambeeya, Ciise dibadda ayuu u baxay, oo wuxuu yimid harada ku dhow xaafadda kafarna'uum.

Bal aynu akhrinno Markos 2:13-14

13-Haddana wuu u baay badda xeebteeda, oo dadkii oodhan baa u yimid, wuuna wax baray.

14-Goortuu ag marayay, wuuu arkay Laawi ina Alafayos, isagoo fadhiya meesha cashuurta lagu qaado, oo uu ku yidhi, isaga, i soo raac. Wuuna kacay oo raacay.

-Markii Ciise soo baxay, ayuu wuxuu la kulmay Laawi.

-Muxuu ahaa magaca labaad ee Laawi?
-Matayos.

-Maxay ahayd shaqada Matayos markii Ciise u yeeray?
-Matayos wuxuu ahaa cashuur-qaade.

-Matayos wuxuu cashuurta u ururin jiray reer Rooma, oo wuxuu cashuurta ka soo qaadi jiray dadkiisa, Yuhuudda ah.

-Waayo cashuurqaadayaasha waxay cashuurta ka soo ururin jireen dadkooda, waxaanay u keeni jireen reer Rooma, dadka Yuhuudda ahna aad bay u nebcaayeen cashuur-qaadayaashan reer Rooma.

-Yuhuudda waxay kaloo nebcaayeen cashuurqaadayaasha waayo iyaga oo dhaniba waxay ahaayeen dad dulli ah, oo khiyaano badan.

-Dadka cashuurqaadayaasha ah waxay Yuhuudda oo ah dadkooa ku khasbi jireen inay bixiyaan cashuur ka badan inta la doonayo, taasoo cashuur-qaadayaashu ay iyaga un la hari jireen.

-Ciise wuxuu u yeeray matayos oo isagu ahaa cashuur-qaade si uu uga mid noqdo xertiisa.



-Maxaa Ciise ugu yeeray cashuur-qaadaha inuu u raaco?

-Waayo Matayos wuxuu fahamsanaa inuu ku dembabay Ilaah.

-Waayo Matayos wuxuu kaloo garanayey in Ilaah dembiga ku ciqaabo dhimasho.

-Waayo Matayos wuxuu kaloo garanayey in Ilaah oo keliya awoodo inuu badbaadiyo isaga.

-Waayo Matayos wuxuu kaloo garanayey in Ciise yahay Badbaadiye.

-Sannado badan kaddib, Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah ayaa ku hoggaamiyey Matayos inuu qoro id ka mid ah Injiilka Masiixa oo loo yaqaanno, Injiilka sida Matayos u qoray oo qayb ka ah kitaabka Qodduuska ah, khaasatan kutubka Axdiga Cusub.

-Maaddaama Matayos aad ugu faraxsanaa inuu rumaysto Masiixu inuu yahay Badbaadiyaha, ayaa Matayos wuxuu casumay Ciise iyo raggii kale inay soo galaan gurigiisa, oo wax la cunaan.

Bal anyu akhrinno Markos 2:15-16

15-Waxaa dhacay markii Ciise gurigiisa cunto u fadhiistay in kuwa badan oo cashuurqaadayaal iyo dembiileyaal raaceen.

16-Culimadii iyo Farrisiintii markay arkeen isagoo dembiileyaal iyo cashuurqaadayaal wax la cunaya, waxay xertiisii ku ydihaahdeen, Waa sidee? Wuxuu wax la cunaa oo la cabbaa cashuurqaadayaal iyo dembiileyaal?

-Maxay haddaba yiraahdeen culimada sharciga ee farrisiinta ahaa

markii ay arkeen Ciise oo wax la cunaya Matayos iyo weliba raggii kale?

-Waxay yiraahdeen, Maxaa Ciise wax ula cunaa dembiileyaasha?

-Farrisiinta ma ayan rumaysnayn inay dembiileyaal yihiin.
-Farrisiinta waxay rumaysnaayeen inaanay dembi lahayn.

-Farrisiinta weliba ma ayan garan in dadka oodhan ay dembi kud hasheen.

-Farrisiinta ma ayan garan in dadka oo dhan ay Ilaah ku dmebaabeen.

-Maxaa Ciise leeyahay markii uu maqlay waxa Farrisiintu lahaayeen?

Bal aynu akhrinno Markos 2:17

17-Ciise goortuu maqlay ayuu ku yidhi, Kuwa ladan dhakhtira uma baahna, laakiin kuwa buka ayaa u baahan. Uma aan imanin inaan kuwa xqa ah u yeedho, laakiin inaan dembiilayaasha u yeedho ayaan u imid.

-Ciise wuxuu u sheegay Farrisiinta in dadka caafimaadka qaba ayan u baahnayn dhakhtar, laakiin kuwa jirran ama buka ay u baahan yihiin.

-Maxaa Ciise taas ula jeedaa?

-Ciise wuxuu ula jeedaa inaanu u imanin inuu badbaadiyo dadka aan garanaynin inay bukaan ama jirran yihiin.



-Ciise wuxuu u yimid inuu bdbaadiyo dadka garanaya inay bukaan ama jirran yihiin.

-Bal aan idiin sharraxo:

-Haddii qofi jirran yahay, laakiin aanu garanaynin inuu jirran yahay, miyuu dhakhtar aadaa?
-Maya.

-Waa maxay Sababta aanu dhakhtar u aadaynin?
-Waayo garan mayo inuu jirran yahay.

-Ciise uma imanin inuu badbaadiyo kuwa ay la tahay inaanay dembi lahayn.

-Ciise wuxuu u yimid inuu badbaadiyo dadka garanaya inay Ilaah ku dembaabeen, iyo inuu Ilaah oo keliya iyaga badbaadin karo.

-Bal waa sidee xaalkaagu?

-Miyaad garanaysaa inaad dembi ku dhalatay?
-Miyaad garanaysaa in aad Ilaah ku xad-gudubtay?

-Miyaad garanaysaa in Ilaah dembi oo dhan ku ciqaabo dhimashada daa'imka ah?

-Miyaad garanaysaa in Ilaah Badbaadiyaha ah oo keliya ku badbaadin karo?

-Haddii aad taas og tahay, Ciise wuxuu kuugu leeyahay: Waxaan dunida u imid inaan ahaado Badbaadiyahaaga.